

# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

Opened: - 10:37 AM

HANSARD No.26/2

Kal-fadhiga 26<sup>aad</sup>

Fadhigii 8<sup>aad</sup> 01/12/2014

### Warbixinta Xisaab Xidhada Miisaaniyadihii Sanadaha 2012 iyo 2013ka, oo Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka JSL.

**Gudoomiye Md. C/raxman M. C/ilaah (Cirro):-** Waxaynu maanta u balan saneyna Warbixinta Warbixinta Xisaab Xidhada Miisaaniyadihii Sanadaha 2012 iyo 2013ka, oo Golaha uu ka jeediyo Hanti-dhowraha Guud, markaa waxaan ku soo dhoweynaya Hanti-dhowraha Guud ee Qaran.

Md. Maxamuud Cabdi Ibraahim Hantid Dhowraha Guud ee Qaranka:-

(**Time 27 Min, 32 sec**) Waxaa noo farxada in aan Golaha hor keeno Xisaab Xidhada **2012-2013**, waxaa kale oo noo farxada in aan Golaha hore ugu soo gudbinay Xisaab Xidhadii Sanadadii hore ee ahaa **2010-2011** iyo **2008-2009**, Hadii aan u soo noqdo hadalka oo aan ka waramo xisaab xidhada **2012-2013**.

**Xisaab Xidhka Sanadkii 2012ka:-** Marka hore waxaan ku bilaabayaa **2012** ka ku talo galka miisaaniyadaa **2012** wuxuu ahaa **639, 393, 274 s/shl** dakhliga dhabta ah ee miisaaniyada caadiga ah ee soo xerooday sanadkaa waxaa uu ahaa **649,740,976,1047 s/shl** dakhligaa soo xerooday **2012** ee misaaniyadu waxaa uu ka badanyahay dakhligii loogu talo galay eek u talo galka ahaa in uu soo xeroodo **1,371,726,937s/shl** xisaab xidhka guud ee misaaniyada **2012** madaxyada qaarkood waxaa ka soo xerooday dakhli kabadan dakhligii loogu talo galay, halka madaxyada qaarna uu ka soo xerooday dakhli ka yar intii loogu talo galay hada ahaatee dakhliga guud ee soo xerooday sanadkaa waxaa uu ka badanyahay ku talogalkii **1,371,726,937s/shl** sidii aan hore u soo sheegay.

Kharashaka miisaaniyada **2012** ku talo galkiisu waxaa uu ahaa **639,396,240,470 s/shl** halka kharashka dhabta ah ee baxay uu ahaa sanadkaa **618,779,267,104s/shl** halkaas oo ka yaryahay kharashkii ku talo galka lacag dhan **20, 589,973,633 sl/sh** kharashka intaa leeg hadii aan si kooban uga hadlo waxaa uu kala haa madaxyadiisu kharashka shaqaalaha, oo ku talagalkiisu ahaa **335,691,948,473 s/shl** halka kharashka baxayna uu ahaa **331,183,070,573 sl/sh** halkaana waxaa la tashiilay oo aan bixin **4,508,877,900 s/sh**.

Kharashka hawsha ku talagalku waxaa uu ahaa **119,801,662,992 s/shl**  
**112,254,766,890 s/shl** halkaana waxaa la tashiilay **7,546,896,178 s/shl**  
Daryeelka iyo dibudhisyada waxaa uu ahaa ku talo galkeedu **6,141,762,333 s/sh**  
kharashka dhabta ah ee baxayna waxaa uu ahaa **6,108,791,210 s/shl** halkaana  
waxaa ka tashiilay lacag dhan **32,991,523 s/sh** Daryeelka dhismayaasha cusub ee  
sanadkaa loogu talo galay waxaa uu ahaa **14,078,796,860 s/sh** kharashka baxay  
waxaa uu ahaa **11,516,326,548 s/shl** halka laga tashiilay 2,571,443,312 Daynta  
qaran sanadkaa kutalogalkeedu waxaa uu ahaa **40,832,591,409 s/shl**.

Sida aad lawada socotaan misaaniyada waxaa ka dhasha wax layidhaa xisaabaaka  
miisaaniyada ka baxsan ama afka qalaad lagu yidhaa (blue over the line of Aconites)  
lacagahaasi inta badan waxay noqdaan lacagaha layidhaa curaaraha gacan ku  
haynta xaga kharashka iyo gacan ku haynta ama harumarinta lacagahaahaa kutalo  
galkoodu waxaa uu ahaa sanadkaa **131,396,024,475 s/shl** dakhliga dhabta ah ee  
soo galayna waxaa u ahaa **130,702,017,696 s/shl** xisaab xidhka waxaa had iyo jeer  
gun dhig u ah in had iyo jeer ay is xidhaan Baanka iyo Khasnadu ama waxaa aan  
soomaaliga ku nidhaa isku dheeli tirka waana ka muujiya in ay xisaabtu had iyo  
jeer saxantahay.

Dakhliga guud ee khasnadu waxaa uu ahaa **780,442,985,083 s/shl** halka  
kharashka guud ee khasnaduna uu ahaa **750,135,291,597 s/sh** hadhaaga guud ee  
khasnadu waxaa uu ahaa **30,307,393,504 s/sh** guud ahaan sanadkaa **31-Dec-2012**  
xisaab xidhkiisu sidaa aan kor ku soo xusay ayuu ahaa.

Isku misaanimadda iyo isku darkiisa guud waxaa uu ahaa misaaniyada caadiga ah  
iyo wixii ka baxsanba oo kala dhamaa dakhligoodu **796,083,364,327 s/sh** sida aad  
lawada socotaan marka lagu gudo jiro ama sanadka miisaaniyadu socoto  
madaxyada qaarkood waxbaa laga wareejaa kuwo kalana loo wareegaa lacagahaahaa  
lakala wareejiyay waxay dhamaayeen **35, 480,650,695 s/shl**.

Gabo-gabada Xisaab Xidhka Miisaaniyada Sanadka 2012kii waxay aheyd guud  
ahaan sidaan soo sheegay ku talo-galka oo ahaa **639, 339, 240,470 SL Sh**,  
dakhliga soo xeroodayna **649,740,397,407 Sl Sh**, taas oo ku talo-galkii uu ka batey  
dakhliga soo xerooday **10,371,726,937 Sl Sh**.

**Warbixinta Xisaab Xidhka 2013ka:-** Sanadkaa 2013ka ku talo-galku wuxuu  
dhamaa **750,000,000,000 Sl Sh ah**, dakhliga dhabta ah ee soo xeroodayna wuxuu  
dhamaa **801,142,492,817 Sl Sh**, markaa sanadkaa 2013ka Miisaaniyadii caadiga

ahayd waxay keentay in dakhligii ku talo-galka ahaa ka bato kharashkii ku talo-galka ahaa **51,142,492,917 Sl Sh** ah, dakhligaa dheeriga ahaa ee soo xerooday 2013kii oo guud ahaan ka kala yimi waaxyaha dakhliga oo qaarkood kor u kaceen iyo madaxyadii dakhliga oo qaarkood hoos u dhacey qaarna iskeenay.

Hase ahaatee dakhliga guud ee Miisaaniyada ee soo xerooday sanadkaa 2013kii wuxuu ka badan yahay dakhligii ku talo-galka ahaa ee Miisaaniyada sanadkaa lacag dhan sidaan hore u soo sheegay **51,142,492,917 Sl Sh**, hadaan madaxyo ahaan ama isku cel-celis ahaanba u sheego Madaxyada intii hore ka batey, kuwa iskeenay iyo kuwa is dhimay isku cel-celiskoodu Sanadkaa 2013ka.

Kharashka baxay Sanadka 2013ka wuxuu dhamaa **740,772,622,951 Sl Sh**, taas oo ah in kharashka baxay Sanadkii 2013ka ka yar yahay ku talo-galka kharashka Miisaaniyada lacag dhan **9,727,317,094 Sl Sh**.

Xisaabaadka Miisaaniyada ka baxsan sidaan hore ugu soo sheegay, miisaaniyada dhexdeeda marka Goluhu ansixiyo waxaa ka dhasha lacago aynu u naqaano xisaabaadka Miisaaniyada ka baxsan (below line of accounts) kuwaas oo xisaab xidhka soo raaca iyana, waxay kala ah sidan hoos ku kala qoran:-

<b>Tiro</b>	<b>Faah-faahin</b>	<b>Dakhliga</b>	<b>Kharashka</b>	<b>hadhaaga</b>
1.	Curaar	100,515,594,958	100,052,844,532	462,750,42
2.	Lacagaha Gacan ku Haynta ah	1,394,283,644	1,394,283,644	
3.	Horumarinta (Advance)	600,000,000	6,600,000,000	(6,000,000,000)
	isugeyn	102,509,878,602	108,047,128,176	(5,537,249,574)

Sidoo kale Sanadka 2013ka Miisaaniyadiisii waxaa la sameeyay waxa la yidhaahdo **KALA WAREEJIN** oo xaga fundka ku yimaada hay'adda dawlada ee kala duwan, Kala Wareejimaha la Sameeyo Madax-Xigaayaasha Miisaanaiyadda 2013 ee Wasaaradaha iyo Hayadaha kale ee Dawladda qaarkood oo lacagtoodu dhantahay **13,103,382,073 Sl Sh**. Ku waasoo oo dhamaantood la hirgaliyey.

#### **Isku dheelitirka khasnad iyo Baanka Dhore ee sanadka 2013ka (Treasury & Bank Reconciliation Statements of the Year Ended 2013)**

- |  |                                |
|--|--------------------------------|
| 1. Dakhliga Guud ee Khasnadda              | = <b>903,652,371,519 SLSh.</b> |
| 2. Kharashka Guudee Khasnadda              | = <b>848,819,751,127 SLSh.</b> |
| 3. Hadhaaga Khasnadda 31/12/2013           | = <b>54,832,620,392 SLSh.</b>  |
| 4. Dakhliga Sannadkii hore 2012            | = <b>30,464,404,053 SLSh.</b>  |
| 5. Hadhaaga Baanku 31/12/2013 Acc 11 & 488 | = <b>85,297,024,445 SLSh</b>   |

War-Bixinta Dakhliga iyo Kharashka ee sanadka 2013 (Statement of Revenue & Expenditure for the year ended 2013) oo isugu jira dakhli iyo kharashba Miisaaniyada Caadiga ah iyo Xisaabaadka Miisaaniyada ka baxsanba wuxu dhamaa Guud ahaanba wuxuu dhamaa **13,145,382,073 Si Sh** dhinac walba is le'eg.

Waxaa kale oo iyana sanadkaa la sameeyay kala wareejimo Miisaaniyada dhexdeeda oo dhamaa 121 kala-wareejimod lacagtooduna dhameyd **13,105,382,093 Si Sh ah**, Xisaab Xidhkii labadaa Miisaaniyadood ee 2012ka iyo 2013ka intaas ayaan ku koobay, waad-mahadsantihiin.

### ***Xidhitaankii Fadhiga (House adjournment)***

**Gudoomiyaha Golaha Md. C/raxman (Cirro):-** Wuxuu mahadsan yahay Hanti-dhowraha Guud, Xisaab Xidhada waa loo qeybiyay Mudanayaasha sida Xogheyn tu sheegtey, mar labaadna waa loo qeybin doonaa, Wixii Su'aalo ah waxaynu lagu weydiin doonaa kulan, Fadhiga Barito waxaa Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka Dabiiciga Goluhu ay Goleweynaha u soo gudbin doonaan Xeerka Ilaalinta keymaha iyo Duur-joogta oo ay Warbixina Golaha ka siin doonaa, Fadhigii maantuna sidaas ayuu ku xidhan yahay.

**Cawad Cali Maxamed  
Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**

**C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**